

# Sharciyada U Degsan Waaxda Booliska

Waxa aad akhrin kartaa sharciyada u degsan Waaxda Booliska oo aad ra'yigaaga ka dhiiban kartaa barta internetka ama fool ka fool.

## Faahfaahin

Waaxda Booliska Minneapolis (MPD) waxa ay sameyneysaa isbedel balaaran oo ku saabsan:

- Hawlgalka, aragtida, qiimaha iyo ujeedooyinka
- Qaar badan oo ka mid ah sharciyadiisa.

Heshiiska la gaaray waxa uu:

- Mid ku saleysan isbedelkaas dhameystirka sharciyada
- Dhiirigelinayaa kalsooni dhex marta MPD iyo bulshada ay u adeegaan

Bulshada waxa ay fursad u heleysaa fursad ay ra'yigooda kaga dhiibtaan sharciyada booliska.

## Qeybaha Sharciyada

- Hawlgalka, aragtida, iyo qiimaha
- Isticmaalka awood dheeraad ah
- Sharciyada heyb sooc la'aanta iyo iilasho la'aanta
- Joojinta, baaritaanka iyo la wareegidda

## Tilmaan

Sharciyadan waxaa loo dajiyey si ay tilmaamo cad u siiyaan saraakiisha:

- Hab dhaqanka la ogol yahay
- Sida loo adeegsanayo
- Sida horjoogayaasha iyo kuwa kale ay u qiimeynayaan in sharciga la raacay

## Shacriyada oo fal loo rogay

- Sharciyada la ogolaaday ayaa la gaarsiiyey Waaxda Tababarada ee MPD.
- Sharciyadu waxa ay dhaqangal noqdaan marka tababarka la dhameystiro.
- Shaqaalaha MPD waa in ay raacaan sharciyada.

## Sharciyada Booliska ee ku saabsan baaritaanka iyo ra'yi ka dhiibashada

Buugan cusub ayaa loo adeegsanayaa in lagu ogaado sharciyada diyaarka u ah in bulshadui ra'yigooda ka dhiibtaan. Buugaan waxa uu qofku ka akhrin karaa sharciga oo ra'yi ka dhiiban karaa qeyb ka mid ah sharciyada ama sharci gaar ah.

## Kulmada Bulshada ee Sharciyada

### Kulmada Bulshada ee Sharciyada Booliska

Waxa aad ka qeyb geli kartaa kulmada fool ka foolka ah si aad ra'yigaaga uga dhiibato sharciyada Waaxda Booliska Minneapolis (MPD).

#### Waxaanu dooneynaa ra'yiga aad ka dhiibato sharciyada booliska

##### Booliska Bulshada

Ilaalinta nabadgelyada bulshada waa marka ay boliiska iyo bulshadu wada shaqeeyaan. Si ay taas si wanaagsan ugu hirgasho, waxaa la doonayaa in bulshadu ka qeyb qaadata oo ra'yigooda ka dhiibtan sharciyada booliska.

Waxa aan dooneynaa in la xaqiiso in hawlgalka, aragtida, qiimaha, iyo ujeedooyinka MPD yihiin kuwo u taagan:

- Hawlgalka, aragtida, qiimaha iyo ujeedooyinka
- iyo baahida bulshada ku dhaqan Minneapolis
- Ilaalinta dadnimada, shaqarafa iyo xuquuqda madaniga ah ee dadka
- Muhimadda ay leedahay sharciyo aan ku dhisneyn heybsooc ee nabadgelyada dadweynaha

##### Hawsha Dib U habeynta

Shaqadan waxaa ka mid ah dib u habeynta sharciyada MPD ee:

- Sharciyada heyb sooc la'aanta iyo iilasho la'aanta
- Isticmaalka awood dheeraad ah
- Joojinta, baaritaanka iyo la wareegidda

##### Sidee ayaan u adeegsaneynaa ra'yi dhiibashadaada

Magaaladu way tixgelineysaa ra'yigiina ka hor inta aanay soo saarin sharciyada ugu dambeeya. Ka dibna waxaa la soo bandhigayaa sharciyada ugu dambeeya. Waxa aad heysataan ugu yaraan 45 cisho in aad ra'yigiina ku dhiibataan sharciyada.

##### Kulamada soo socda ee kulanka bulshada